**XEERKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 25 Disember 1972, Lr.8.**
**Xeernidaamiyaha fulinta Sharciga Lr.19, ee 11 Maarso 1972, oo ku saabasan baabiínta Xafiisyada Notaayadaha Gaarka.**

## GUDDOOMIYAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida Kowaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga Lr.19, ee 11 Maarso 1972, oo ku saabsan baabiínta Xafiisyada Notaayadaha Gaarka;

MARKUU ARKAY Sharciga 15 Febraayo 1962 ee Lr. 8 iyo isbeddellada dambe ee lagu sameeyey, Sharciga Lr.29, ee 1 Abriile 1970 “Nidaamka Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda iyo isbeddelladiisa dambe” iyo weliba Sharciga Lr.47, ee 18 Agosto 1970, oo ku saabsan qodobbada Guud ee Xeernidaamyada fulinta Sharciyada;

MARKUU GARWAAQSADAY in ay lagamamaarmaan tahay in shaqada Dawladda lagu biiriyo karaaniyada fikirka ku shaqeeya (hal-abuurka leh) iyo kuwa amarka ku adeega ee oo joogtada ugu hawlgeli jiray Xafiisyadii la baabiíyey ee notaayadaha gaarka ahaa, taas oo looga qiyaas-qaadanayo hawlihii gaarka ahaa oo laga dhigay kuwo dawladeed;

MARKUU ARKAY SOO-JEEDINTA Xoghayaha Dawladda ee Garsoorka iyo Arrimaha Diinta;

### WUXUU SOO SAARAYAA XEERKAN

### Qod. 1

Hawlaha notaayada waxaa fulinaya Dawladda, ayada oo adeegsaneysa saraakiisheeda guud oo sida gaar ah ugu tababaran fulinta hawlaha soo socda, ayaga oo ku hoos shaqeynaya hoggaanka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta:

a) Sameynta qoraallada mucaamalooyinka dhexmara dad iyo dardaarannada, ayaga oo siinaya sharciyad iyo aaminaad dadweyne, xafidaadda, kana bixinaya nuqullo iyo khulaasooyin xagga nuxurka;
b) Sameynta iyo sugitaanka qoraallada ku saabsan ka-markhaati-furka arrimo shaac ah;
c) Qabasha, sugidda iyo haynta keydka qoraallo rasmiga ah, qoraallo gaarka iyo dokumentiyo;
d) Saxiixidda iyo suntidda buugaagta ganacsi;
e) Sugitaanka caddeyn dhaar la socoto ee la xiriirta runnimada warbixin khabiir iyo tarjumaad;
f) Fulinta awaamirta madaxda Garsoorka ee u baahan shaac-bixin, sida shaabbad saarid, qoraal tirakoobyo, iyo iib xaraash ah.

### Qod. 2

Agagaarka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta waxaa laga dumayaa saraakiil ka mid ah shaqaalaha joogtada oo lagu magabaabay Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka, ayada oo uu soo-jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta ee u xilsaaran fulinta hawlaha ku xusan qodobka 1, ee Xeerkan.

**Qod. 3**

Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta waxa ay soo bandhigeysaa tartamo caam ah, ayada oo u dejineysa xeerarka iyo habka ka-qaybgalka, sí loo daboolo baahida loo qabo saraakiil dawladeed oo notaayayaal ah ee ka hawlgala magaalo madaxyada gobollada iyo degmootinka.

**Qod. 4**

Saraakiisha notaayayaasha ah, ee ka hawlgelaya Magaalo-madaxyada Gobollada iyo Degmooyinka, waxaa goáaminaya Xoghayaha Dawladda, ee Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta, ka dib marka uu qiimeeyo baahida dhabta iyo tirada iyo mugga qoraallada mucaamalooyinka la sameynayo.

**Qod. 5**

Saraakiisha notaayayaasha ah waxa ay ka tirsan yihiin shaqaalaha Dawladda, waxa ayn yeelanayaa waajibaadka iyo xuquuda ku tilmaaman Nidaamka Shaqaalaha Dawladda ee Rayidka.

**Qod. 6**

Ma jirto wax khidmad xurmadeed ah oo saraakiisha notaayayaasha ahi ku qaadanayaa fulinta hawlahooda ku xusan qodobka 66 ee Nidaamka Notaayada (Xeer Sharci lr. 1 ee 2dii Maarso 1962).

Sí waafaqsan qodobka 2 faqraddiisa 2aad ee Sharciga 11 Maarso 1972 ee lr. 19, ayaga waxaa mushahar siinaysa Dawladda, ayada oo la tixgelinayo kooxda iyo derejada ay kaga jiraan nidaamka meeleynta iyo isu-dumidda iyo shaqaalaha rayidka ah.

Ayaga waxaa kale oo la siinayaa gunno xirfadeed oo dhan Sh. So. 500 kuwooda haysta shahaado jaamacadeed iyo 300 kuwa aan haysan shahaado jaamacadeed.

**Qod. 7**

Hawlaha notaayadeed ee ku xusan qodobka 1 ee Xeerkan – Xeer–hoosaadka fulinta – waxaa laga qaadayaa qaddar lacag ah ee kaga aaddan qiimaha mucaamalada, taas oo ah xuquuqda la xiriirka qoritaanka qoraalka mucaamalada.

Boqolkiisa saddex 3% qaddarkaas lacagta (qaddar lacag ah ee ku aaddan qiimaha) waxaa yeelanaya sarkaalka notaayaha ah, ee qoray macaamalada, inta kalana waxaa lagu shubayaa khasnadda Dawladda.

**Qod. 8**

Qaddarka lacagta oo laga qaadayo qoraalka mucaamalada ee ku xusan qodobka hore (la soo dhaafay) waxaa loo xisaabaya sí saleysan qodobbada (axkaamta) ku jira Xeer–hoosaadka ku saabsan xuquuda Notaayada Guud.

## QODOBBADA KALA GUURKA IYO DHAMMAADKA

### Qod. 9

Notaayayaasha waqtiga hadda ah u tababaran ku shaqeynta xirfadda waxaa la gelin karaa isku-dunka shaqaale ee notaayayaasha saraakiisha Dawladda ee ku xusan qodobka 2, haddii ay codsi u qaddimaan Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta, 15 maalmood gudahood oo ka bilaabanta dhaqangalka Xeerkan.

Ayaga waxaa lagu magacaabayaa Notaayayaal saraakiil Dawladeed ah, ayada oo lagu soo saarayo Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare, ee Kacaanka waxaana la siinayaa derejada A-6 ee shaqaalaha rayidka ee Dawldda.

### Qod. 10

Shaqaalaha maskaxda ku shaqeeya iyo kuwa amarka ku shaqeeya ee ka hawlgala Xafiisyada Dawladeed, ee Notaayayaasha saraakiisha Dawladeed ah, waxaa shaqada la qoraa, ka dib soo-jeedinta Xoghayaha Dawladda ee Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta, sí waafaqsan habraaca ku xusan qodobka 13 ee Nidaamka shaqaalaha Rayidka ee Dawladda (Sharci lr.29 ee 1 Abriil, 1970 iyo isbeddelladiisa dambe).

Soojeedintaas waxaa loo sameynayaa Agaasinka Guud ee Shaqaalaha isu-dumidda sí waafaqsan qodobka 2 Sharciga lr. 66 ee 29 Oktoobar 1972 (Xeerarka ku saabsan shaqaale u-qoridda Dawladda iyo aagga gaarka ah), ayada oo la siinayo tisgelinta shaqaalaha joogtada uga hawlgali jiray Xafiisyada Notaayayaasha Gaarka ahaa (oo hadda la baabíiyey), ayada oo laga ambaqaadayo qiyaaska iyo macnaha xeerarka loo dejiyey aagagga gaarka ee la dawladeeyey.

Notayayaashaas waxaa lagu meeleynayaa isudunka shaqaalaha Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta.

Derejada iyo heerkooda waxaa goáaminaya Guddi loo xilsaaray, ayaga oo goáankooda ku saleynaya shahaadada waxbarasho iyo shaqooyinkii uu qofkaas horey u soo qabtay, sí waafaqsan qodobbada Nidaamka shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda.

### Qod. 11

Qoraallada mucaamalooyinka, oo ay notayayaashu qabtaan iyo kuwa ay bixiyaan, marka uu dhaqangalo Xeerkan, waxa ay noqonayaan kuwo meelmar buuxa leh (miradhal ah).

### Qod. 12

Culeysyada iyo kharashyada Xeerhoosaadkan ee fulinta Sharciga lr. 19 ee 11 Maarso 1972 waxa ay cusleysleynayaan miisaaniyadda Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta oo la fulinaya ayada oo laga tashanayo Xoghayaha Dawladda ee Maaliyadda.

**Qod. 13**

Xeerkan waxa uu dhaqangelayaa laga bilaabo 1[da] Luulyo 1972.

Muqdisho, 25[ka] Disember 1972.

GUDDOOMIYAHA
Golaha Sare ee Kacaanka
**S/Gaas Maxamed Siyaad Barre**

XOGHAYAHA DAWLADDA ee qaabilsan
Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta
Brof. Cadiqani Shekh Axmed

*ARKAY Diiwaangeliyeyna – Diiwaan lr. 5, Xaashi lr. 8*
*Muqdisho, 30[ka]Disember 1972*
*Hantidhowrka Guud:*
*Gaashaanle Cabdullahi Warsame Nuur*